



# Ogow in Dambiilayaasha iyo Khaa'imiintu Bartilmaameedsadaan soo galootiga!

Khaa'imiinta ayaa badanaa raadsada kooxo gaar ah si ay uga xadaan lacagtooda. Soo galootiga ku sugaran Maraykanka waa mid ka mid ah kooxahan oo laga yaabee haddii aysan taxaddarin inay lumiyaaan lacag marka ay raadinayaan caawimaad ku saabsan waraaqaha socdaalkooda . Kuwaas oo kale maahan oo keliya inay lacagtaada la baxaan, laakiin sidoo kale waxay dhaawac u geysan karaan fursadahaaga inaad ku guuleysato ogolashaha deganaanshahaaga iyadoo markaa aan buuxin foomamka saxda ah, aan laguu sheegin taariikhaha maxkamadaha, kaa seegaya ama aanan haleynin taariikhyaada kama dambaysta ah ee muhiimka ah, ama siinaya talo sharci ahaan oo khaldan. Daabacaaddan waxay sharxaysaa sida loo aqoonsado la iskana ilaaliyo khaa'iniinta iyo waxa la sameeyo haddii lagu kхиyaameeyo.

## Dambiilayaasha isku ekaysiiya qareenada

Nasiib darro, dadka qaarkood waxay ka faa'iidaystaan kuwa u baahan qareenada sharciyada degenaansha iyagoo iska dhigaya qareen si ay lacag uga xadaan. Maraykanka, haddii qof kula soo xidhiidho isagoo isticmaalaya TikTok, WhatsApp, ama Facebook isagoo sheeganaya inuu yahay qareen sharciyada degenaansha, arinka noocaasi badanaa waa mid been abuur ah ama kхиyaano ah. Sharciyada Minnesota waxay mamnuucayaan in qareen si toos ah kula soo xidhiidho si uu adeegyo sharci ku siyo haddii adeegyadaasi aan lacag la'aan lagu bixinayn.

Calaamado kale oo muujinaya in qofku aanu ahayn qareen laakiin doonayo inuu lacagtaada xado waxaa ka mid ah inuu kugu hanjabo masaafuris haddii aadan lacag siin, inuu kugu cadaadiyo inaad lacag i dhakhso ah aad ku bixiso ama inuu kugu khasbo inaad lacag bixiso adoo adeegsanaya kaarka hadiyadda.

Mid kale oo kuu sheegi kara inay kхиyaano tahay ayaa ah haddii qofka xayeysiyo qiimo aad uga hooseeya qareennada kale ee sharciyada degenaansha—haddii uu u muuqdo mid aad u wanaagsan inuu run noqdo, waa kхиyaano!

Haddii qof uu sheegto inuu qareen yahay , waydii gobolka uu ku leeyahay ruqsadda sharciga qireenimada. Kadib, la xidhiidh ururka qareenada ee gobolkaas si aad u xaqijiso inuu xaq u leeyahay inuu halkas ka shaqeeyo. Haddii qof uu sheegto inuu yahay "wakiil la aqoonsan yahay," wac EOIR lambarkooda (703) 305-0470 ama booqo <https://www.justice.gov/eoir/%20recognized-organizations-and-accredited-representatives-roster-state-and-city> si aad u hubiso haddii ay u qalmaan inay ku caawiyaan waraaqaha degenaansha.

## Soo Gudbi Danbiyada

Haddii aad rumaysan tahay in lagaala soo xiriiray acoon been abuur ah oo TikTok ah, waxaad warbixin ka bixin kartaa acoonkaas adoo booqanaya [support.tiktok.com/en/safety-hc/report-a-problem/report-an-impersonation-account](https://support.tiktok.com/en/safety-hc/report-a-problem/report-an-impersonation-account). Haddii aad rumaysan tahay in lagaala soo xiriiray acoon Instagram been abuur ah, waxaad acoonka ka warbixin kartaa adoo tagaya [https://help.instagram.com/192435014247952/?helpref=uf\\_share](https://help.instagram.com/192435014247952/?helpref=uf_share).

Haddii aad rumaysan tahay in agaala soo xiriiray acoon Facebook been abuur ah, waxaad acoonka ka warbixin kartaa adoo booqanaya [https://www.facebook.com/help/1380418588640631/?helpref=hc\\_fnay](https://www.facebook.com/help/1380418588640631/?helpref=hc_fnay). Waaad sidoo kale wax badan ka baran kartaa sida aad isku ilaalin karto Khiyaameynta khadka tooska ah adoo booqanaya uscis.gov/avoid-scams.

Haddii aad ogtahay in khaa'iniintu ku nool yihii Minnesota, waxaad ka warbixin kartaa kхиyaameyntaasi xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Minnesota adoo booqanaya: <https://www.ag.state.mn.us/Office/Forms/ConsumerAssistanceRequest.asp>. Haddii aadan aqoon halka uu khaa'imiintu ku nool yahiihin, waxaad cabasho uga gudbin kartaa khadka tooska ah ee Guddiga Ganacsiga Federaalka (FTC) adoo booqanaya reportfraud.ftc.gov.

"Notarios" Kuma Caawin karaan Haddii adiga ama qof aad taqaan u baahan yahay caawimaad ku saabsan waraaqaha degenaansha, waxaad aad la shaqeen kartaa oo kaliya qareennadda degenaanshaha oo ruqsad qareenimo haysta ama wakiil la aqoonsan yahay. Ka gudub"Notarios." Notarios ma aha



The Office of the  
**Minnesota Attorney General**  
helping people afford their lives and live with dignity, safety, and respect

445 Minnesota Street, Suite 600, St. Paul, MN 55101  
Twin Cities Calling Area: (651) 296-3353 • Outside the Twin Cities: (800) 657-3787  
Minnesota Relay: (800) 627-3529  
[www.ag.state.mn.us](http://www.ag.state.mn.us)

qareeno, mana qaban karaan wixii uu “notario” ka qaban karo waddamada kale. Adeegga keliya ee loo ogol yahay notaries-ka Maraykanka waa inay xaqiijiyaan aqoonsiga qof ku qoran dokumenti. Ma bixin karaan wax talo sharci ah mana gudbin karaan waraaqaha degenaanshaha.

Qareen ruqsad haysta ama “wakiil la aqoonsan yahay” oo kaliya oo u shaqeeya hay’ad ay aqoonsatay Waaxda Caddaaladda ee Maraykanku ayaa ku siin kara talo sharci oo ku saabsan degenaansha.

Qareennada iyo wakiillada la aqoonsan yahay waa inay sharxaan sharciga iyo doorashooyinkaaga si aad go’anno muhiim ah uga gaarto kiiskaaga. Waxay sidoo kale kaaga baahan yihiin inaad saxeexo dhammaan waraaqaha ay diyaariyaan, kuna siiyaan qoraal ku saabsan adeegyada ay bixiyen iyo qiimaha aad bixisay, ilaalinta xogtaada, iyo inay ku wargeliyaan taariikhaha muhiimka ah.

Qareennadu waa inay sidoo kale kugu soo wargeliyaan horumarka kiiskaaga, ku siiyaan nuqullo dhammaan dokumentiyada, xataa haddii aad lacag ku leedahay, oo ay kaaga jawaabaan wicitaannadaada ama iimayladaada.

Ka Digtoonow, ha saxeexin foomamka degenaanshaha ee bannaan (aan waxba ku qorneyn) ama kuwa ka kooban macluumaad khaldan oo ku saabsan adiga ama xaaladdaada. Notario aan daacad ahayn ayaa laga yaabaa inuu ku waydiisto inaad sidaas sameyso. Ha u ogolaan notario ama qof kale inuu hayo dokumentiyadaada asalka ah ama uu kaa qanciyo inaad bixiso macluumaad khaldan. Siinta dowladda macluumaad khaldan waxay saameyn ku yeelan kartaa xaaladdaada degenaansha.

Ururka Qareennada degenaanshaha iyo soo galootiga ee Maraykanka (AILA) wuxuu leeyahay mashruuc loogu talagalay dhibanayaasha kхиyaamada “notarios.” Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kхиyaamada notarios, booqo: [www.stopnotariofraud.org](http://www.stopnotariofraud.org). Haddii qof aan qareen ahayn ee ku sugar Minnesota uu kaa iihiyo adeegyo sharci, waxaad ka dacweyn kartaa xafiiska Xeerilaaliyaha Guud ee Minnesota.

## Foomamka Dowladda – Waa Bilaash!

Waligaa ha bixin lacag foomamka sharciyada degenaanshaha ee dowladda Maraykanka. Foomamka dowladda waa bilaash waxaana laga heli karaa adiga oo booqanaya: [www.uscis.gov/forms/all-forms](http://www.uscis.gov/forms/all-forms). Qaarkood kхиyaano sameeyayaasha waxay abuuraan bogag u eg kuwa rasmiga ah ee dowladda. Waxaad arki kartaa bog been abuur ah oo leh ereyo sida “Degennaanshaha Maraykanka” iyo sawirro calanka Maraykanka ama Taallada Liberty, laakiin waa inaad hubisaa in cinwaanka bogga uu leeyahay “.gov” si aad u xaqiijiso inuu yahay mid sax ah. Bogagga been abuurka ah waxaa loo isticmaalaa in lagaa xado lacagtaada ama macluumaadkaaga gaarka ah—ha ku dhicin kхиyaamadooda!

## Helista Qareen Sharciyada Degenaan Shaha

Hubi in qof kasta oo ku caawinaya kiiskaaga sharciyada degennaanshaha uu leeyahay ruqsad uu ku shaqeeyo. Haddii aad rabto inaad hesho qareen sharci oo bilaash ah ama kharashkiisu yar yahay, booqo: justice.gov. Iisticmaal calaamadaha xigashada oo raadi “list pro bono service providers.” Wuxaa sidoo kale ka raadin kartaa adeegyo sharci oo bilaash ah ama qiimo jaban iyo adeeg bixiyeasha sharci ee la oggolaaday, fiiri bogga [uscis.gov/avoid-scams/find-legal-services](http://uscis.gov/avoid-scams/find-legal-services).

Wuxaa sidoo kale daawan kartaa liiska qareennada sharciyada degenaanshaha ee Ururka Qareennada sharciyada degenaanshaha Maraykanka adiga oo booqanaya: [www.ailalawyer.com](http://www.ailalawyer.com). Si aad u hubiso in qof uu yahay qareen ruqsad haysta oo ka shaqaynaya gobolka Minnesota, booqo Minnesota Judicial Branch: <https://mars.courts.state.mn.us>. Dhammaadka warqaddan, waxaa jira liis kheyraadyo kale oo kaa caawin kara.

## Xasuusnow!!!

### Markasta:

- ✓ Ka hel macluumaadka deganaanshaha dowladda Maraykanka, adiga oo ka bilaabaya [uscis.gov](http://uscis.gov) ama [state.gov](http://state.gov).
- ✓ Hubi in qofka ku caawinaya uu yahay qareen ama wakiil la aqoonsan yahay.
- ✓ Hel rasiid haddii aad qof lacag siisid inuu ku caawiyo.
- ✓ Hel nuqullo dhammaan foomamka laguu diyaariyey.
- ✓ Xafid dhammaan waraaqaha iyo ogeysiis yada aad ka hesho USCIS meel aamin ah.
- ✓ Maamul kiiskaaga adiga oo adeegsanaya qalabka caawimada ee bogga [uscis.gov/tools](http://uscis.gov/tools).

### Waligaa ha:

- ✗ Ha bixin lacag foomamka sharciyada degenaanshaha. Foomamka waxaad si bilaash ah uga heli kartaa [uscis.gov/forms](http://www.uscis.gov/forms), adigoo wacaya 1-800-870-3676, ama adigoo booqanaya xafiiska USCIS ee kuugu dhow.
- ✗ Ha saxeexin foom bannaan. Hubi in dhammaan foomamka ay dhamaystiran yihiin ka hor intaadan saxiixin.
- ✗ Ha saxeexin foom kasta oo ka kooban macluumaad khaldan.
- ✗ Ha u dirin dokumentiyadaada asalka ah taageerada codsigaaga haddii aysan USCIS si gaar ah kuugu codsan.
- ✗ Ha la shaqeeyin “notario” si uu kuugu diyaariyo ama kuu gudbiyo dokumentiyada sharciyada degenaanshaha.

## Ilo Sharci oo Bilaash ah oo Loogu Talo Galay dadka soogalootiga iyo Qaxootiga

### Advocates for Human Rights

Difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha waxay caawiyaan dad helaya qareeno bilaash ah si ay uga caawiyaan qaxootiga magangelyo doonka ah, dadka ka badbaaday ganacsiga dadka, carruurta kelidood u yimid Maraykanka, iyo dadka ay hayaan ICE.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (612)-341-3302  
Khadka Macaamiisha soo galootiga: (612)-341-9845  
Ama booqo:

<https://www.theadvocatesforhumanrights.org/Home>

### International Institute of Minnesota

Machadku wuxuu bixyaa adeegyo iyo kheyraadyo caawiya Muwaadiniinta Cusub inay si fudud ugu gudbaan nolol cusub oo horseeda inay si dhaqaale ahaan iskood isku filnaadaan. Laga soo bilaabo barashada luqadda iyo tababarka shaqada ilaa fasallada dhalashada iyo xafladaha dhaqameed, machadku wuxuu Muwaadiniinta Cusub u siiyaa waddo ay si adag ugu bilowdaan nolol cusub oo ka mid ah bulshadeenna – taas oo dhammaanteen ka faa'iidaysano.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac:  
(651)-647-0191, kadib riix 2 ee Socdaalka  
Ama booqo:

<https://iimn.org/programs/immigration-and-citizenship/>

### Lutheran Social Services of Minnesota (LSS)

LSS waxay ka go'an tahay inay siiso dhammaan dadka fursad ay ku noolaadaan kuna shaqeeyaan bulsho nolol dhammaystiran leh. LSS waxay bixisaa Adeegyo Sharci oo Socdaal oo qiimo jaban ah si ay uga caawiso qaxootiga, magangelyo- doonka, iyo soo-galootiga kale ee ku nool Magaaloyinka Mataanaha ah iyo St. Cloud inay buuxiyaan dokumentiyada socdaalka, oo ay ku jiraan

- Dhalashada Degganaanshaha Joogtada ah
- Dhalashada Muwaadinnimada
- Ogolaanshaha Shaqada iyo
- Codsiyada Fiisaha Qoyska.

Kulan talo-bixin iyo qiimeyn bilaash ah ayaa laga heli karaa xafiiska Minneapolis maalinta Talaadada kasta.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (612)-879-5258  
Ama booqo:  
<https://www.lssmn.org/services/refugees/services/immigration>

### Minnesota Council of Churches - Refugee Services

Barnaamij soo galootiga oo soo dhaweeya dadka la takooray ee ka imanaya daafaha caalamka. Waxay bixiyaan adeegyo gaar ah oo loogu talagalay soo-galootiga iyo qaxootiga si ay uga caawiyaan waddadooda isku filnaanshaha dhaqaale iyo inay ku taageeraan inay gaaraan riyooyinkooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (612)-230-3224

Ama booqo:

<http://mnchurches.webbrohd.com/what-we-do/refugee-services/immigration-legal-services>

### Immigrant Law Center of Minnesota (ILCM)

ILCM waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo bixisa caawimo sharci oo ku saabsan socdaalka soo-galootiga iyo qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ee ku sugar Minnesota.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac:

(651)-641-1011 ama (800)-223-1368

Ama booqo: [www.ilcm.org](http://www.ilcm.org)

### Mid-Minnesota Legal Aid (MMLA)

MMLA waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo bixisa caawimo sharci oo ku saabsan socdaalka soo-galootiga iyo qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ee ku sugar Minnesota.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: 1-877-696-6529

Ama booqo: [mylegalaid.org](http://mylegalaid.org).

### Southern Minnesota Regional Legal Services (SMRLS)

SMRLS waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo bixisa caawimo sharci oo ku saabsan socdaalka soo-galootiga iyo qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ee ku sugar Minnesota.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: 1-877-696-6529

Ama booqo [smrls.org](http://smrls.org).



The Office of the  
**Minnesota Attorney General**  
helping people afford their lives and live with dignity, safety, and respect

445 Minnesota Street, Suite 600, St. Paul, MN 55101  
Twin Cities Calling Area: (651) 296-3353 • Outside the Twin Cities: (800) 657-3787  
Minnesota Relay: (800) 627-3529  
[www.ag.state.mn.us](http://www.ag.state.mn.us)

## Volunteer Lawyers Network (VLN)

VLN waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo bixisa caawimo sharci oo ku saabsan socdaalka soo-galootiga iyo qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ee ku sugaran Minnesota. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (612) 752-6677 Ama booqo: [vln.org](http://vln.org).

## Arrive Ministries

Arrive Ministries waa hay'ad dib-u-dejin qaxooti oo ka caawisa qaxootiga iyo soo-galootiga helitaanka guryo, daryeel caafimaad, shaqo, iyo adeegyo sharci oo ku saabsan socdaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (612)-798-4332

Ama booqo: <https://arriveministries.org/immigrant-services/>



Sida Loo Ogaado  
Khiyano



Sida la isaga Ilaaliyo  
Khiyano\*\*



Ilalinta Asturnaantaada



Khiyaanooinka  
Fariimaha Gaagaaban  
ee Qiyaanada ah  
("Smishing")



Khiyaanada Baraha  
Bulshada



Xuquuqda Shaqaalaha  
Soo-galootiga\*



Siyaasadda Dib-u-  
dhigista  
Tallaabooyinka\*



Milkiilayaasha Guriga iyo  
Kiraystayaasha: Xuquuqda  
iyo Waajibaadka\*

## Daabacaado Dheeraad ah

Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Minnesota wuxuu daabacaad macluumaad ku saabsan sida aad iskaga ilaalin karto khiyaamooyinka caanka ah iyo khiyaamada macaamiisha. Daabacaadahan waxaad ka heli kartaa khadka tooska ah ee: [www.ag.state.mn.us/publications](http://www.ag.state.mn.us/publications). Tusaalooyinka daabacaadaha la heli karo:

\*Lagu heli karo af Isbaanish

\*\*Lagu heli karo afka Hmong iyo Soomaali